



War murtiyeedka Shirka Wasiirada Maaliyadda iyo Maamulka Gobolka Banaadir

Kampala, Uganda
23th-Nov-2019

Shirka Wasiirada Maaliyadda Dalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir oo ay soo qaban qaabisey Wasaaradda Maaliyadda DFS ayaa lagu qabatay magaalada Kampala, Uganda 18th-24th ka November 2019, si ay uga wada hadalaan horumarinta arrimaha la xiriira hagaajinta iyo sare-u-qaadidda habsami u-socodka arrimaha maaliyadda dalka. Shirkaan ayaa daba socday shir lagu qabtay September 14keeda magaalada Addis-ababa ee Ethiopia oo looga hadlaayay arrimo dhowr ah oo la xiriira maamulka maaliyadda dalka.

Shirka waxaa shir guddoomiyay Wasiirka Maaliyadda DFS mudane, **Cabdiraxman Ducaale Beyle** iyadoo ay ka soo qeyb galeen Wasiirka Maaliyadda Puntland, Wasiirka Maaliyadda Jubbaland, Wasiirka Maaliyadda Koonfur Galbeed, Wasiirka Maaliyadda Galmudug, Wasiirka Maaliyadda Hirshabeele, iyo Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Banaadir ee dhinaca Maaliyadda. Waxaa shirka marti ku ahaa sii hayaha Safiirka Safaaradda Soomaaliya ee Dalka.

Kadib markii ay Wasiiradu dhagaysteen talo soo jeedinta guddiga farsamada, waxay isla qaateen qodobada hoos ku xusan:

1. In aan mar-naba aan la siyaasadayn arrimaha maaliyadda dalka;
2. In loo wadaago xogaha maaliyadeed dalka si joogta ah, lana ilaaliyo dahsoonaanteeda;
3. In la sameeyo habka wadaagga xogaha ee u dhaxeeya Wasaaradaha Maaliyadda si kor loogu qaado aqoonta iyo macluumaadka arimaha maaliyadda dalka, isla markaasna la sameeyo hab heshiis lagu yahay oo lagu maamulo xogta (Information sharing matrix);

4. DXDFS, Maamulka G.B iyo DFS waxay ku heshiiyeen bartilmaamedyo (Benchmarks) ku xiran lacago, gaar ahaan dhanka Dakhliga iyo Kharashka si loo dar-dargaliyo hanaanka geedi socodka maaliyadda isla markaasna la xoojiyo hufnaanta Maamulka Maaliyadda dalka, halka bartilmaameedyadaas ay soo jeedinayaan DXDFS iyo Maamulka Gobolka Banaadir;
5. In daraasad lagu sameeyo arimaha maaliyadda ee dastuurka, lana waafajiyo hanaanka federaalka iyadoo loo gudbinaayo wasiirada maaliyadda ugu dambeyn 16/12/2019;
6. In Wasaaradda Maaliyadda DFS ay dadejiso lacag bixinta DXDFS iyo Maamulka G.B, kuna bixiso muddo ku siman 14-cisho oo ka bilaabata marka dhammaan habraaca lacag bixinta la soo dhamaystiro;
7. In la soo dhameestiro xubnaha Guddiga ka maqan si rasmi ah, ugu dambayn 16/12/2019;
8. In Wasiirada Maaliyadda iyo Maamulka G.B ay ansixiyaan habraaca KMG ee lacag wareejinta DXDFS (Fiscal Transfer Policy Paper);
9. In dhammaan go'aannada shirarka Wasiirada Maaliyadda iyo Maamulka Gobolka Banaadir lagu gaaro hab wada-ogol, is-qancin iyo isu-tanaasul ah;
10. In kulankan kulanka xiga la qabto 21/12/2019 laguna qabto magaalada Kismaayo

Micnaha erayada:

DF – Dowladda Federaalka Soomaaliya

DXDFS - Dowladaha Xubanaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya

G.B – Gobolka Banaadir

Saxiixayaasha

1. Cabdiraxmaan Ducaale Beyle

Wasiirka Maaliyada DFS

2. Hassan Shire Abdi

Wasiirka Maaliyadda Puntland


3. Abdirashid Jire Khaline

Wasiirka Maaliyadda Jubbaland

4. Ahmed Mohamed Hussein

Wasiirka Maaliyadda K. Galbeed

5. Saciid Siyaad Shirwac



Warmurtiyeedka Shirka Wasiirada
Maalidda, November 23, 2019
Shirkii 2baad sanadkaan


Wasiirka Maaliyadda Galmudug

6. Abdishakur Abukar Hassan

Wasiirka Maaliyadda Hirshabeele

7. Ibrahim Omar Mahadle

Guddoomiye K/Xigeenka Gobolka Banaadir

Three handwritten signatures are positioned on the right side of the page, each on a horizontal line. The first signature is at the top, the second is in the middle, and the third is at the bottom. The signatures are written in dark ink and are somewhat stylized.